State Government Victoria
Department of Education and Early Childhood Development

Maths tips to help your child
Before School - Year 2
Somali

# Nasteexooyinka Xisaabta si loo caawiyo ilmahaaga

**Ka-hor dugsiga - Sannadka -2aad**

Ilmo kasta ha helo fursad kasta










# Xisaab kuwada sameynta guriga

Qoysasku waa samaynta kowaad oo ugu badan xagga koritaanka ilmaha. Waxaad samayn kartaa isbaddel adigoo taageera wax-baridda ilmahaaga ee dugsiga iyo ku caawintooda inay guriga wax ku bartaan.

Waxaad u malayn kartaa in xisaabta uu ilmahaagu dugsiga ku barto inay ka duwan tahay sidii wax laguu soo baray, si kastaba ha ahaatee, waxaad weli siyaabo badan u taageeri kartaa ilmahaaga.

Buug-yarahan wuxuu bixinayaa fikrado aad ilmahaaga kula sahmin karto xisaabta oo uu ku baranayo asagoo cayaaraya iyo nashaadyada qoyska ee maalin kasta.

Waxtar weyn bay u noqon kartaa inaad ilmahaaga ka qaybgeliso nashaadyadan oo kale luqaddooda kowaad, iyo Ingiriisiga haddii aad ku hadli karto.

### Macalinka Ilmahaaga

Macalinka ilmahaagu wuxuu talooyin kaa siin karaa sidaad u caawin lahayd xirfadaha xisaabta ee ilmahaaga. Mowduucyada qaarkood waxaad kala hadli kartaa macalinka kuwaas oo ay ka midka yihiin:

- Heerka wax-qabadka ilmahaaga ee howlaha xisaabta.
- Hadafyada uu ilmahaagu u shaqaynayo inuu ka gaaro xagga xisaabta, iyo sida aad u taageeri karto ilmahaaga inuu arimahaas gaaro.
- Xeeladaha aad isticmaali karto si aad ilmahaaga u caawiso xagga meelaha ku adag asaga ama ayada.

### Qalabyada Intarneedka

Website-ka cusub new *Connect-Primary* ee Dowladda Victoria ayaa sahla si aad ula xiriirto qalabyada wax-barasho ee kombiyuutarkaaga guriga, kombiyuutarka maktabadda degaanka, ama dugsigaaga.

Ka eeg website-ka Connect-Primary oo loogu talagalay ardayda dugsiga hoose oo ah:
**http://www.education.vic.gov.au/primary**

Website-ka *Connect-Primary* waxaa hubiyey macalimiinta si loo hubiyo inuu ku habboon yahay inay isticmaali karaan carruurtu.

Xusuuso, hadda aad gasho website-yada kale aan ku qornayn Website-ka *Connect-Primary*, xagga ammaanka darteed, waa inaadan intarneedka ku siin faahfaahinta shaqsigaaga, sida magacaaga ama magaca ilmahaaga oo dhammaystiran, dugsiga, lambarka taleefanka ama cinwaanka cid kasta oo aadan garanayn.

*Ultranet* waa nadaam intarneed ah oo cusub kaas oo ku siin kara macluumaadka ku saabsan wax-baridda ilmahaaga ee dugsiga. Waa website dowlad-goboleedka oo dhan ah, ammaan ah kaas oo ardayda oo dhan, waalidiinta iyo macalimiintuba ay ka heli karaan intarneedka. Ka eeg website-ka *Ultranet* oo ah:
**www.education.vic.gov.au/about/directions/ultranet/benefits/parents.htm**

## Dukaan matelida ciyaar ahaan




- Soo ururi cunto iyo alaabta cuntada laga sameeyo qiimona u same kuna dheji.
- Ka hadal sidaan uga bixino inagoo isticmaaleyna lacagta warqada ah iyo gadaadiicda/googa'a alaabta.
- Isticmaal lacagta lagu ciyaaro si aad uga soo iibsato una gado alaabta dukaanka.
- Dalbo alaabta cuntada ah xajmi ahaan (ta ugu dheer ilaa ka ugu gaaban) ama kharash ahaan (ka ugu qaalisan ilaa ka ugu raqiisan).
- Bar miisaamada jikada dukaanka si aad u miisaanto cuntooyinka qaar sida sanduuq caleenta shaaha ama xirmo bariis ah kuna dalbo alaabta culeyskooda.

## Ciyaarida cayaaraha



- Ciyaar ciyaaro si aad u garato qaababka, lambarada iyo siday isu raacsan yihiin.
- Laadhuudu waa wax ku darida ururinta alaabta lagu ciyaaro oo aad u weyn. Rid laadhuuda oo dheh, samee ama qor lambarada soo baxa. Rid laba laadhuu ka dibna isku dey lambarada si aad u hesho wadarta.
- Kula ciyaar ciyaarta lambarada ee interneetka ilmahaaga. Iskuday website kan: **http://www.abc.net.au/countusin/**

## Sameynta qaabab wada socda



Garashada iyo sameynta qaabab wada socda waa u muhiim xirfada xisaabta ee sahaminta lambarada, qaababka iyo waxyaalaha laba isle'eg u qaybsami kara.

- Garo oo sharax qaababka muuqaalka ah ee dharka, warqadaha wax lagu duubo, alaabta wax lagu kariyo, kaadhadhka iyo alaabta guriga.
- Isticmaal biinanka dharka oo midabo leh, loox go'an, kuul ama fargeeto, qaado, iyo midi si aad u bilowdo qaabka ilmahaaga si uu u sii wado. Tusaale ahaan, casaan, buluug, caddaan, casaan, buluug, caddaan.
- Dhiirigeli ilmahaaga inuu wax sawiro, hal abuuro iyo inay sharxaan qaababkooda. U isticmaal iyaga xaddad ahaan ama kaadhadhka salaanta ama alaabta dushooda.

## Cabiraada alaabta



- Isticmaal shaxda cabiraada derbiga si aad ugu cabirto dhererka dadka ee qoyskaaga.
- U jar go' xadhig ah ilmahaaga, dherer kastaa wuu na anfacayaa. Isticmaal xadhiga si aad ugu sharaxdo alaabta gurigaaga taal si aad u ogaatid waxa ka dheer ama ka gaaban 'xadhigaaga cabiraada'. Weydii ilmahaaga inuu garto wixii isku dherer ah.
- Sahami siyaalo kale oo cabiraad adoo isticmaalaya koob, joog qaado, ulaha jalaatada la geliyo, raadka ama dhererka gacanta.
- Dhis minaarad loox ah oo ka dheer alaabta ciyaarta ee aad ka hesho.Weydii ilmahaagu inuu tiro tirade loox ee lagu cabirayo dhererka munaarada.

## Aada ugaarsiga lambarada

- Ilmahaaga iyo adigu raadiya lambarada idinku hareeraysan, tusaale lambarada guryaha, jadwalka taariikhda.




- Eeg oo dheh lambarada ku yaal baabuurta taarikadooda, calaamadaha, iyo jadwalka taariikhda, wargeyska, buugta alaabta dugaamada laga gato, calaamadaha xawaaraha, lambarada guriga.
- Isticmaal lambaro kala duwan meeshii bilowga ahaan ee carbinta lambarada, tusaale ka bilow tirinta 6 ama 10. Weydii ilmahaaga inuu u tiriyo hore iyo gadaal. Weydii lambarkee baa ka horeeya ama lambarkeebaa ka danbeeya.
- Garo lambarada ku yaal xisaabiyaha. Ka isticmaal xisaabiyaha interneetka ee hadlaya **http://pbskids.org/cyberchase/games/calculator/calculator.swf**

## Isticmaalida kaadhadhka ciyaarta



- Ciyaar adoo la doonanaya ciyaaraha lambarada kaadhadhka ciyaarta.
- U dhig kaadhadhka si isku xigta adoo ka bilaabaya ka ugu weyn ilaa ka ugu yar adoo tirinaya qaababka (hearts, spades) ama isticmaalaya lambarada kaadhadhka ku yaal.

## Adoo weydiinaya su'aalo si aad u baadho



Weydii ilmahaaga su'aalo si aad u dhiirigeliso iyaga inay baadhaan xisaabta.

*Qaabab noocee ayaad arki kartaa...?*

*Sidee baan u cabiri karnaa...?*

*Sidee baan ku heli karnaa badh...?*

*Waa maxay sida ugu wanaagsan ee loo qaybsan karaa...?*

## U bedelida xisaabta sheeko

U bedel dhacdooyinka maalin laha ah ama alaabta sheeko xisaab ah. Kuwan waxaa ka mid ah ka hadlida:

- Tirinta miraha ku jira baaquliga miraha
- U jarida miraha lix go'
- Tirinta inta dad ah ee ku safraya gaadhiga ama baska.



Ku dhiirigeli ilmahaaga inuu sawiro iyo inuu ka hadlo wax ku saabsan dhawr alaabo ah ee sawirada ay sawireen. U qor ilmahaaga fikradihiisa sheeko ahaan. Halkan waxaa ah waxoogaa tusaalooyin ah:

- Waxaa ku jira shan xabbo oo miro ah madiibada. Saddex waa tufaax iyo labana waa moos.
- Boostadeyda qalimaanta waxaa ku jira afar shay. Hal qalin qori oo cad, hal qalin qori oo buluug ah iyo laba qalin qori oo cagaar ah.

## La dhaqaaqida xisaabta

Fikradahan waxay isticmaalaan dhaqdhaqaaqa jidhka, maqlida codka, isticmaalida indhaha iyo ku dareemida gacmaha si aad u barato tirinta.

*Intee tallaabo ayey qaadaneysaa in lagu gaadho..?*

*Intee jeer baad taaban kartaa buufinka ka hor intuusan dhulka taaban?*

*Intee ayey kugu qaadaneysaa inaad ka boodboodo..?*



## Xoogga saar tirinta

Tirintu waa khibradaha ugu horeeya ee xisaabta ee carruurta yar-yar. Barashada erayada wax tirinta badanaa waxay ku bilowdaan heestaad ugu jeceshahay ama waxyaalaha isku sida u dhawaaqa, iyo ku celcelinta magacyada lambarada.

Isla marka tirinta carruurtu ay horumarto, waxay gelaan xirfado cusub oo xisaabeed.

Isla markay carruurtu u guuraan tirada ururinta alaabta waxay bilaabaan inay ku xiriiriyaan shey kasta hal magac oo lambar. Bilow ahaan, ku dhiirigeli ilmahaaga inuu taabto shey kasta isla markay yiraahdaan magaca lambarka ee u dhigta,

Carruurtu waxay bilaabi doonaan u tirinta alaabta koox-koox, tusaale ahaan, faraha gacmaha iyo kuwa lugaha, badhamada dharkooda, jaranjarooyinka guriga ama alaabta ay ku ciyaaraan.

Markaad bilaabaysid tirinta koox alaab ah, waxaa laga yaabaa inay carruurtu u habeeyso alaabta si isku xigta si ay u caawiso. Ka dib ayey bilaabi doonaan inay bilaabaan tirinta shey kasta si ay u helaan wadarta.

Carruurta qaarkood waxay u baahan doonaan inay ku celiyaan tirada alaabta haddii sii loo habeeyey la bedelay, sida looxaanta waxay ku jiraan saf haddana waa koox-koox. Tani waxay noqon kartaa wax fiican in la sahamiyo fikrada in lambarka ugu danbeeyaa ee la tiriyey uu leeyahay inta ka midka ah kooxda.

Carruurtu waxay u baahan yihiin khibrado badan oo ah sameynta, tirinta, sawirida iyo ka hadlida lambarada.

Samee waxyaalo isku xigga ilmahaaga adoo sharxaya sida lambarada iyo tirintu ay uga midka yihiin nolol maalmeedka.

**Ma ku dayday fikradahaan tirinta ah guriga?**

- Tiri noocyada cuntada marka lagu rido trolley – ga ama lagugu furfuro guriga.
- Tiri mar kasta oo la tuuro kubada markaad ciyaar ciyaareyso.
- Tiri talaabooyinka aad u qaadeyso xagga sanduuqa waraqadaha, albaabka hore, xadhiga dharka.
- Ururi oo tiri waxyaalaha sida alaabta lagu ciyaaro, aleesha, kuusha.
- Tiri maalmaha jadwalka taariikhda. Tiri maalmaha ka sokeeya dhacdo khaas ah.